FSAU
Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada ee Somalia

Waxa la soo saaray
22 February 2006

# Hubinta Cuntada & Nafaqada

**Warbixinta Kooban ee February 2006**

Cimilada

Suuqyada

Nafaqada

Beeraha

Xoolaha

Arrimaha Gobolka ee Soo Shaacbaxaya

Cinwaanka:
FSAU - Somalia
Kalson Towers,
Parklands
Box 1230 Village Market
Nairobi, Kenya
Tilifoonka:
+254 20 374 5734
Faakiska:
+254 20 374 5098
Iimaylka:
fsauinfo@fsau.or.ke
www.fsausomali.org

## Arrimaha ugu muhiimsan: Qiimeynta Xiliga Deyrta 2005/6 kadib

Kadib tilmaamo hore oo muujinaya in xaaladda hubinta cuntada ee koonfurta Soomaaliya ay aad u xumaanayso, FSAU iyo FEWSNET waxay bilaabeen inay soo saaraan digniino hore bishii November '05, inay kordhiiyaan muddada qiimaynta Deyrta ee gudaha laga sameeyey, iyo inay ballaadhiyaan mudada iyo goobaha ay saamaynayso qiimaynta gudaha ee laga sameeyey Koonfurta si fahmid qotodheer looga helo xiisadda. FSAU iyadoo la kashaanaysa FEWSNET Somalia iyo ilaa afartan hay'adood oo kale oo la isbahaystay waxay howlaha qiimaynta ka samaysay dhammaan Soomaaliya bishii December '05. Howlaha qiimaynta gudaha waxa ka dambeeyey kulamo taxane ah oo heer gobol ah lagu sameeyey falanqayn iyo kulamo guud ahaaneed oo lagu adkaynayo falanqaynta oo la qaybtay toddobaadkii u horreeyey ee January '06. 18kii January natiijooyinka waxa loo soo bandhigay Dawladda ku Meel Gaadhka ah ee Federaaliga ah ee Soomaaliya, hay'adaha Jimciyadda Quruumaha ka dhaxaysa, hay'adaha aan dowliga ahayn ee caalimiga ah iyo kuwa gudaha, hay'adaha deeqda bixiya iyo hayado kale oo la isbahaysto kulanla Kooxda Hubinta Cuntada aiyo Horumarinta Miyiga ee Hay'adda Taageerada Soomaaliya (FSRD/SACB). Warbixintani waxay xanbaarsantahay arrimaha ugu muhiimsan Taxanaha Farsamada Lambar IV.8 ee Falanqaynta Deyrta 2005/6 Kadib oo Af Ingriisi ku soo baxay 22ka February 2006.

**NATIIJOOYINKA MUHIIMKA AH**
Dad lagu qiyaasay **1.7 malyuun oo jooga** Gobollada Waqooyiga, Dhexe iyo Koonfurta Soomaaliya ayay soo food saartay **Xiisad Cuntada iyo Hab-noloeedka ah oo Aad u Xun** ama **Gurmad Bina-aadamnimo** ugu yaraan ilaa bisha June ee 2006 (Sanduuqa *1 iyo Khariidadda 1*). Haddii Dadka Gudaha ku Barakacay lagu daro oo ah qiyaastii **400,000**, wadarta guud ee dadka u baahan kaalmo dhammaan dalku waa **2.1 malyuun oo qof**. Xiisaddu waxay gaar ahaan aad u xuntahay goboladda Koonfurta ee Soomaaliya, halkaas oo qiyaastii **1.4 malyuun oo qof ay degdeg ugu baahanyihiin kaalmo bina-aadamnimo.** Natiijooyinku waxay xaqiininayaan digniinihii hore ee lagu bixiyey in soo saarka dalaggalagu guul-darraystay; in xooluhu ay aad u dhinteen, in qiimaha dalaggu uu aad u kordhayo, qiimaha xoolaha oo hoos u dhacaya, guuritaanka dadweynaha oo aan caadi ahayn, iyo si xun oo ay u yaraadeen **biyaha iyo cuntadu** (eeg Warbixinaha Kooban ee *FSAU ee November iyo December 2005*).

Iyadoo ku xidhan jawaabcelinta iyo fursad-u-helidda gargaarka bina-aadamnimada, halista ka imanysa inay dhacdo collaad ku salaysan hanti, saadka cuntada iyo biyaha oo yaraaday, FSAU waxay digniin dheeraad ah ku bixinaysaa inay jirto **Halis Dhexdhexaad ah oo ah inay Macaluuli dhici karto** dhowrka bilood ee soo socda Gobolka iyo hareeraha Gedo (Khariidadda 1). Haddidaad ku aaddan bulshada bina-aadanminada dhowrkii maalmood ee la soo dhaafay waxay keentay in la joojiyey dullimaadyadii diyaaradaha, sidaas darteedna waxa istaagay fursad-uheliddii, degmooyinka Garbahaarrey iyo Luuq ee gobolka Gedo. Shilkan u dambeeyey wuxuu tilmaan ka bixinayaa colaadi inay dhici karto, sida ay u adagtahay xaaladdu iyo sida ay u saamaynayso jawaab-celinta bina-aadamnimada.

Waxa culays sii saaraya dhibaatada haysata dadka Koonfurta abaarta oo ah mid heer gobol ah, iyadoo ku fidsan Itoobiya iyo Kenya isla markaana saamaynaysa dhul balaadhan oo ah qaabka hab-nololeedka Soomaalida. Heerka goboleed ee abaartan saamaynteedu ay leedahay waxay si toosa uga tarjumaysaa in fursadaha u adkaysiga abaartu ay yaryihiin marka la eego qaab weynaha hab-noloneedka Soomaalida (tusaale haan guuridda oo yaraata taageerada bulshada oo culayska saarani bato) iyo culays dheeraad ah oo horeba u saaraan saadka kooban. FSAU waxay hors-eed u ahayd kulamo taxane ah oo soohdinta ka dhaafsiisan oo ay la yeelatay hay'adahay ay isbahaystaan xagga farsamada ee hubinta cuntada ee Kiiniya iyo Itoobiya si hore loogu mariyo fahmid xagga falanqaynta ah oo loo simanyahay oo kus aabsan xiisadda hubinta cuntada ee goboladda soohdimaha wadaaga. Isbahaysigan hore ee xagga farsamada ah waxa yeeshay hay'adaha ka shaqeeyaha gobollada soohdinta wadaaga (FEWSNET, Barnaamijka Cuntada Adduunka "WFP", Sandquua Badbaadada Carruurta ee Ingriiska "SC(UK)", CARE, UNDP, Horumarinta Caalamiga ee Maraykana "USAID", OXFAM, ALRMP, OCHA, Wasaaradda Beeraha ee Kiiniya). Waxana lagu dabaqay Qoondaynta Xaaladda Hubinta Cuntada iyo bina-aadamnimada abaarta oo saamasay geeska iyo Bariga Afrika. Qoondayntaas oo si cad u tilmaamaysa heerka ay abaartu gaadhsiisantahay iyo sida ay u xuntahay xisadda bina-aadamnimadu (khariidadda 2).

Gobollada Koonfurta waxa soo food saartay xiisad qotadeedu ay sii dheeraanayso bilaha soo socda. Waxyeeladda abaartu way sii badan doontaa waanay sii xumaan doontaa xiliga Jilaalka ee qalalan iyadoo ku xidhan illaa heerka ay gaadhsiisanyihiin waayidda hab-nololeedka iyo nolosha ee mudadan, goboladaasi waxay u baahan doonaan taageero bina-aadamnimada h iyo taageero horumarka ah oo sii socda dhowrka bilood ee sii soda. Haddii roobabka Guga '06 lagu guul-darraysto gobollada koonfurta waxa soo food saari doonta **masiibo xagga bina-aadamnimada ah** oo uu heerkeedu la mid yahay macaluushii 1993 ka dhacday Koonforta Soomaaliya.

Waa in lagu nuuxnuuxsado in jawaab-celinta bina-aadamnimada ee loogu baahanyahay xiisaddu la abbaaro iyadoo la isticmaalyo hab-nololeedyo kala duwan, "lana lamaanaysa lab qaab". Taaso macnaheedu waxa weeye in wax laga qabto baahdia degdegga ah ee lagu badbaadinayo nolosha (cuntada, biyaha, caafimaadka, nafaqada), laakiin isla markaana in wax laga qabto baahida hab-nololeedka ee mudada dhexe sida ilaalinta iyo dib u habaynta hantida wax soosaarka leh (xoolaha, iniinyaha, qalabka, ceelasha, biyo xidheenada, biyo mareenada iyo seeraha ). Haddii fiiradu ay saarantahay keliya in wax laga qabto baahida degdegga ah – dhammaan qaabka hab-nololeedku wuxuu noqon doonaa bulsho ku tiirsan gargaar, saboolnimo sii qoto-dheeraata iyo xiisadda bina-aadammnimada oo daba dheeraata.

*qoraalku wuxuu ku sii socdaa bogga 2*

***SAAMAYNTA JAWAAB-CELINTA:***

- **Jawaab-celinta:** jawaabcelin kala duwan ayaa loo baahanyahay oo ay ku jiraan: gargaar cunto, kaalmo lacag naqad ah, gargaar iyo dib-u-haybayn biyaha ah, mashaariic badbaadinta xoolaha ah (oo ay ku jiraan xoolo-goyn, ilaalinta xoolaha dhala iyo in la bixiyo cows), kaalmo caafimaadka iyo nafaqada ah iyo ilaalinta kooxaha nugul.
- **Wakhtiga Jawaab-celinta**: **Jan. - May:** Jawaab-celinta bina-aadamnimada ee ku aaddan baahida degdegga ah, ilaalinta iyo dib-u-habaynta hantida ee muddada dhexe. **June – Dec.:** Haddii roobabka Guga '06 ay si fiican u da'aan, in lagu wado kaalmada baahida degdegga ah ee la siinayo badi dadweynaha nugul iyo in si buuxda loogu wado howlaha ku aaddan ilaalinta iyo dib-u-habaynta hantida. Haddii roobaka Gugu '06 lagu guul-darraysto, in la kordhiyo laguna wado jawab-celinta baahida degdegga ah oo la balaadhiyo lana xoojiyo.
- **Hirgelinta Jawaab-celinta:** Maamullada Soomaalida, ururrada bulshada iyo shaqaalaha bina-aadamnimadu waxay u baahanyihiin inay degdeg u kor u qaadaan tallaabooyinka lagaga hortegayo inay masiibo ballaandhani dhacdo. Hoggaamiyeyaasha Soomaalidu waxay muhiim u noqon doonaan hubinta nabadsugidda iyo fursad-u-helidda dhulka ay abaartu saamaysay.
- **Jawaab-celinta xagga dhaqaalaha:** Deeqbixiyeyaashu waa inay degdeg u bubiyaan in hay'adaha iyo ururradu ay haystaan taageero buxuuda oo xagga dhaqaalaha ah si ay u hirgeliyaan jawaab-celinta loo baahanyahay. Sidii lagu muujiyey xiisaddii hore, dadka Soomaalida ah ee Dibedaha joogaa door ayay ka ciyaari karaan dhimidda xiisadda iyagoo isticmaalaya lacagaha ay diraan.
- **Jawaab-celin Heer Gobol ah oo siman ah**: jawaab-celin bina-aadamnimo oo miisaman, baahi ku salaysan oo la siiyo dhammaan gobolka ay abaartu saamayso (Soomaaliya, Itoobiya & Kiiniya) ayaa loo baahanyahay si looga hortago inay ku sii korodho xisaddu dadweynaha guuraya ee isaga gudbaya soohdimaha iyo colaad ka kacda hanti.
- **Xiisadda oo noqta fursad**: Sida ay adagtahay xiisaddu waxay kicin doontaa in la ogaado xaaladda ay ku jirto Soomaaliya iyadoo laga eegayo dhinaca bulshada caalamiga ah iyo dhinaca dadka Soomaaalida labadaba. Haddi si waxtar leh loo isticmaalo, shiidaal-kan waxa loo adeegsan karaa in la abbaaro arrimaha dhibaatada u sababta ah ee ku wadi doona inay mijo-xaabiyaan hab-nololeedka Soomaalida abidkood haddii aan wax laga qaban. Fursadaha muhiimka ah waxa ka mid ah muujinta faa'idooyinka urro bulsho oo shaqaynaya oo loo maro hoggaanka TFGda, iyo in dib loo celiyo isbedelka weyn ee ku dhow inaan waxba laga qaban karin ee dhibaatada loo gaysanayo seeraha iyadoo loo jarayo dhirta soosaarka dhuxusha.
- **Qorshe lagu diyaargaroobo dhacdooyinka**: Saadaasha hore ee cimiladu waxay muujinaysaa inay dhici karto in roobabka Guga "06 ay ka hooseeyaan caadi. Sidaas darteed, dhammaan dadka ka shaqeeyaha bina-aadamnimado waa inay u diyaar garoobaan waxa dhici kara haddii xaaladdu ay ka sii darto, taasoo ay ku jiri karto macaluul aafadeedu ay balaadhantahay.

**ARRIMAHA UGU MUHIIMSAN GOBOLLADA**

- **GOBOLADA KOONFURTA**

**Sanduuqa 1: Qiyaasta Dadweynaha Ku jira Gurmad Bina'aadamnimo (GB) iyo Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX), oo ay weheliyaan Kooxaha Halista Weyn ku jraa.**

| Gobollada | Qiyaasta Dadweynaha [1] | Qiyaasta la qiimeyey iyo ta ku meelgaadhka ah ee Dadweynaha ku jira XCHAX iyo GB | | |
|---|---|---|---|---|
| | | Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo aad u xun (XCHX) [2] | Gurmada Bina-aadamnimo (GB) [2] | Wadarta qiyaasta ku jira XCHX iyo GB oo ah % Dadweynaha Gobolka |
| **Waqooyi** | | | | |
| Bari | 235,975 | 45,000 | 0 | 19 |
| Nugaal | 99,635 | 20,000 | 0 | 20 |
| Sanaag | 190,455 | 55,000 | 0 | 29 |
| Sool | 194,660 | 50,000 | 0 | 26 |
| Togdheer | 302,155 | 40,000 | 0 | 13 |
| Xeebta (kalluumaysi) | | 20,000 | | |
| Isku-dar | *1,022,880* | *230,000* | *0* | *22* |
| **Dhexe** | | | | |
| Galgaduud | 319,735 | 40,000 | 0 | 13 |
| Mudug | 199,895 | 20,000 | 0 | 10 |
| Isku-dar | *519,630* | *60,000* | *0* | *12* |
| **Koonfur** | | | | |
| Bakool | 225,450 | 45,000 | 105,000 | 67 |
| Baay | 655,686 | 135,000 | 395,000 | 81 |
| Gedo | 375,280 | 80,000 | 180,000 | 69 |
| Hiiran | 280,880 | 55,000 | 0 | 20 |
| Jubbada Hoose | 329,240 | 60,000 | 115,000 | 53 |
| Jubbada Dhexe | 244,275 | 50,000 | 120,000 | 70 |
| Isku-dar | *2,110,811* | *425,000* | *915,000* | *63* |
| **Wadar** | 3,653,321 | 715,000 | 915,000 | *45* |
| Dadweynaha La Qiimyeey iyo qiyaasta suurtagalka ah ee tirada ku jira XCHAX ama GB | | 1,630,000 | | *22* [6] |
| Dadweynaha Magaalooyinka ee ku nool Goobo ay Xiisadi ka jirto Koonfurta[3] | | 30,000 | | *1* [6] |
| Qiyaasta Wadajirka ah ee La qiimeeyey ee Dadwynaha Magaalooyinka ee ku jira XCHAX iyo GB | | 1700000 [4] | | *23* [6] |
| Qiyaasta Tirada Dadka Barakacay[5] | | 400,000 | | *6* [6] |
| Qiyasta Wadarta Dadweynaha ku jira Xiisad | | 2,100,000 | | *29* [6] |

Footnotes

[1]Waxa soo saaray: WHO 2004. Xusuus tan waxa ku jira oo kelya tirada dadweynaha gobolada saamoobay. UNDP qiyaasta dadkweynaha heerka gobol ee ay soosaartay 2005. Hase yeeshee qiyaastaasi lama gabagabayn sidaas darteed laguma isticmaalin falanqayntan.
[2]Qiyaasta tirada waxa lagu soo koobay shanta kun ee ugu dhow taasoo ku salaysan tirada dadweynaha deggan iyadoon la tixgelin dadka u soo guuray hadda iyo kuwa la filayo wase ku jira dadweynaha halista sare ugu jira XCHAX iyo GB (qiyaasii 210,000) taasoo loogu talagalay qorshaynta.
[3]waxa lagu qiyaasay 30% iyo 20% tirada dadkweynaha magaalooyinka ee ku jira Gurmada Bina-aadamnimo iyo XCHAX .
[4]Tirada dhabta ahi waa 1,655,000, hase yeeshee tirada waxa lagu soo koobay 1,700,000 si loogu isticmaalo qorshaynta ayna u sahasho isgaadhsiinta warka.
[5]Waxa soo saaray: UN-OCHA oo la cusboonaysiiyey April 2004 (376,630) iyo khariidadda Dadka Gudaha ku Barakacay ee UNHCR December 2005 (407,000), oo lagu koobay 400,000 qiyaasahaan.
[6]Qiyaasta boqolkiiba ee wadarta dadweynaha Soomaaliya; 7,309,266 WHO 2004.

**Khariidadda 1: Falanqaynta Xaaladda Hubinta Cuntada ee Soomaaliya: Saadaasha Deyrta 2005/6 Kadib, January 2006 illaa July 2006**



Koonfurta Soomaaliya hadda waxa soo foodsaaray Gurmad Bina-aadamnimo oo aad u xun oo halisnimadiisu ay ka xoogweyntahay gurmadyada bina-aadamnimo ee kale ee ka jira adduunka. Qiyaastii **1.4 malyuun oo qof oo jooga gobollada Gedo, Jubba, Baay, Bakool iyo Hiiran waxa soo foodsaaray xalaalado ah Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo aad u xun** ama **Gurmad Bina-aadamnimo** waxana ay degdeg ugu baahanyihiin kaalmo bina-aadamnimo (Khariidadda 1 iyo Sanduuqa 1). **915,000** oo qof oo ka mid ah qiyaasta 1.4 malyuun ahi waxay joogaan gobollada Gedo, Jubba iyo qaybo ka mid ah Baay iyo Bakool waxana hadda lagu tilmaamay inay ku jiraan xaalad ah **Gurmad Bina-aadamnimo.** Gedo oo ah goobta sida ugu xun ay abaartu u saamaysay waxa lagu tilmaamay inay ku jirto **Halis Dhexdhexaad ah inay Macaluuli ka dhacdo** bilaha soo socda. Waxa weeye in la tilmaamo inay jiraan laba goobood oo ka mid ah dhulka ku jira Gurmad Bina-aadamnimo inay horeba ugu jireen xaalad muddo dheer jirtay (in ka badan 3 sano) oo ah Gurmad Bina-aadamnimo. Kuwaas oo ah Waqooyiga Gedo (Beled Xaawo, Doolow, iyo qaybo ka mid ah luuq) iyo hareeraha Wabiyada Jubba (Saakow, Bu'aale Jilib iyo Jamaame) (Khariidadda 1). **425,000** qof oo kale oo jooga qaybo ka mid ah Bakool, Baay iyo Jubba iminka waxay ku jiraan **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun.** Waxana ay **Halis Weyn** ugu jiraan inay galaan xaalad ah **Gurmad Bina-aadamnimo** ka hor June '06. Waxa kale oo ku jira qiyaasta 1.4 Malyuun oo qof oo ku jira Gurmad Bina-aadamnimo iyo Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo aad u xun 30,000 oo qof oo jooga tuulooyinka ama magaalooyinka yaryar ee goobaha ay xiisaddu ka jirto ee Gedo, Jubba, Baay iyo Bakool

**Map 2. Falanqaynta Xaaladda Hubinta cuntada ee Dhulka Soohdinta La Leh Soomaaliya: Saadaasha Deyrta 2005/6 Kadib, January 2006 Illaa July 2006**




Xiisadda hadda taagan badi waa natiijada laba xilli oo is xiga oo roobabku ay liiteen (roobabkii Guga '05 oo caadi ka hooseeyey, oo ay ka dambaysay in si buuxda loogu guul-daraystay roobabkii Deyrta '05), taasoo ay weheliso nabad la'aanta sii socota. Dhammaan qaababka hab-nololeedka (beer-iyo-xoola-dhaqatada, xoola-dhaqatada iyo beeralayda webiyada) abaartani way saamaysay. Fursad-u-helidda cuntada iyo dakhliga culays weyn waxa saaray soosaarka dalagga iyo xoolaha oo liita, fursadaha dakhliga oo kooban (mushahaaradaha iyo iibka soosaarka), hantida luntay ama la'edday (dalagga iyo xoolaha), iyo iswaydaarsiga ganacsiga oo sii xumaanaya (qiimaha dalagga oo kor u kacaya iyo qiimaha xoolaha oo hoos u dhacaya). Xitaa xiisaddan ka hor, heerar aad u xun oo nafaqa-darro ah ayaa ka jiray badi goobaha ay abaartu saamaysay oo horeba ka mid ahaa kuwo ugu xun gobolka. Heerarka nafaqadarradu waxay gaadhayeen in ka badan 20% dherarka oo loo eegay culayska qofka ama cago-barar ay keentay nafaqa-darro oo ka jira qaybo ka mid ah Gedo. Tilmaamo hore oo muujinaya in xaaladda nafaqadu ay sii xuumaanaysayo ayaa horeba lagu arkay kuwo badan oo ah dhulka sida ugu xun u saamoobay (qaybo ka mid ah Beled Xaawo, Luuq, Diinsoor, Qansax Dheere , Baydhaba, Raab Dhuure, Ceel Barde iyo Afmadow). Soosaarka dalagga ee sannadka ee Gedo, Jubba, Baay iyo Bakool badi waa lagu guul-darraystay, isagoo u dhexeeyey 7-23% celceliska dagaalkii ka dib ee sannadka. Qiimaha dalagga ee Gedo, Jubba, Baay iyo Bakool si degdeg ah ayuu u kordhaya, 50% intii u dhaxaysay Nov.-Dec. oo keliya waxana la filayaa inuu ku wado inuu si weyn u kordho bilaha soo socda. Qiimaha hadhuudhka, oo guud ahaan ka jaban iminka wuu ka badanyahay qiimaha galayda Shabeelooyinka isagoo gaadhay halkii ugu sarraysay shantii sano ee la soo dhaafay. Gedo, qiimaha hadhuudhku in ka badan labanlaab ayuu noqday taniyo bishii September '05.

Daaqa iyo biyahu si xun ayay u yaraadeen, gobollada ugu darani waa Gedo, Jubba, Baay iyo Bakool. Horeba qiyaastii 20-30% lo'du Gedo waxay u dhinteen cows iyo biyo la'aan iyo cudurro abaarta la xidhiidha. Qiyaasaha horena waxay sheegayaan in ilaa 80% lo'du ay dhiman doonaan inta laga gaadhayo bisha April. Xaaladda jidhka oo liidata darteed, qiimaha lo'du aad ayuu hoos ugu dhacay in ka badan 50% dhowrkii bilood ee la soo dhaafay. Xoola-dhaqatada ku howllan xeeladaha u adkaysiga dhibaatada oo ay ku jiraan guuritaan ama hayaan aan caadi ahayn, xoolaha oo ilmaha laga soo ridayo si loo badbaadiyo xoolaha dhalaya, haraga oo xoolaha dhinta lagala baxayo, xoolaha dhalaya oo la iibinayo, xoolaha oo la geynayo goobo uu gendi leh, iyo iyadoo la gowraco xoolaha taagta daran si loogu naxariisto marka ay ku jiraan hayaanka ay biyo ku raadinayaan. Abaartan oo saamaysay Geeska/Bariga Afrika (khariidadda 2), waxay sii xumaysay dhibaatada haysata xoola-dhaqatada waayo abaartan macanaheedu waxa weeye in fursadaha hayaanka ama guuritaanka ee u furani ay koobanyihiin iyo in culayska saaran biyaha iyo daaqu uu sii kordhay xoolo Kiiniya iyo Itoobiya ka soo guuray dartood.

- **GOBOLLADA DHEXE**

Inkasta oo Gobollada Dhexe ay ka soo kabanayaan xaalad hore oo ah Gurmadkii Bina-aadamnimo, wali waxay ku jiraan xaalad ah **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (Khariidadda 1).** Horumar ayaa ka jira badi Galgaduud iyo koonfurta Mudug (inta u dhaxaysa Cadaado /Gelinsoor, Hobyo iyo Xarar Dheere) xaaladdu se way sii xumaanaysaa sababtoo ah colaadda sii socota darteed. Wadar ah 60,000 oo qof ayaa lagu qiyaasay inay ku jiraan xaalad sii socota oo ah **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun** tiradaas oo 40,000 oo ka mid ahi ay joogaan Galgaduud 20,000 na ay joogaan koonfurta Mudug (Sanduuqa 1).

Roobabka Deyrta '05/'06 ka da'ay badi dhulka xoola-dhaqatadu caadi way ka hooseeyeen (waxay u dhaxeeyeen 20% iyo 80%), iyadoo goobaha qaar roobabka da'ay ay caadi ka sarreeyeen in ka badan 150% . Tani waxay taageersaa dib u soo kabashada goobahaas, gaar ahaan maaddaama ay ka dambaysay roobab caadi ka sarreeyey oo da'ay Gugii '05, iyo roobabkii Deyrtii '04/05 oo iyana fiicnaa. In kasta oo badi Galgaduud ay ka faa'iidaysatay horumar xagga nabadsugidda ah, colaad aan la xalilin oo ka jirta koonfurta Mudug iyo waqooyiga Galgaduud ayaa ku wadda inay tahay caqabad hortaagan dib u soo kabashada hab-nololeedka. Coladda qabiil ee ku saabsan soohdimaha ayaa qasay guuritaanka dadka iyo xoolaha,taabtayna fursad-u-helidda suuqyada isna hortaagay ganacsiga. Dad ka soo barakacay nabad la'aanta hadda ayaa jooga Dhuusa Mareeb, Cadaado, Bandiiradley iyo Xarar Dheere. inkastoo ay jiraan goobo ay biyo la'aani ka jirto, xaaladda daaqa waxa loo arkaa inay tahay caadi asddaamaha dib u soo kabashadana waxa ku jira xaaladda jidhka xoolaha oo hore u martay, iyo dib u soo kabashada soo saarka iyo dhalmada xooalaha oo sii socota.

**Gobollada Waqooyiga**

Gobollada Waqooyiga goobaha ka soo kabanaya abaartii 3da sano jirtay iyo gurmadka bina-aadamnimado weli waxay ku jiraan xaalad ah **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun** taasoo ay u sabab tahay dib u dhaca dib u soo kabashada hab nololeedka marka la eego xoolaha badan ee dhintay, tirada xoolaha ee yaraatay iyo deymanka weyni dadka lagu leeyahay (khariidadda 1). Qiyaastii 230,000 oo qof ayaa ku jirta **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun** waxana ay u baahanyihiin taageero hab-nololeedka ah oo degdeg ah. Tan waxa ku jira qoysaska sida xun u saamoobay ee ay ka luntay hantidu (qiyaastii 30,000 oo qof) oo iminka ku kooban magaalooyinka iyo tuulooyinka dhammaan gobolladaas iyo qiyaastii 20,000 oo qof oo ka tirsan kalluumaysatada xeebaha oo uu saameeyey Sunaamigii (Sanduuqa 1A iyo 1B).

Dib u soo kabashada hab-nololeedka xoola-dhaqatadu wuu socdaa badi degmooyinka kadib guudahaan roobabkii caadiga ka sarreeyey ee da'ay Dayrtii 05, kuwaas oo ka dambeeyey roobab aad u fiicnaa oo da'ay Gugii '05 iyo raabab caadi ka sarreeyey oo da'ay Deyrtii '04. Goobaha helay roobab liita Deyrtii '05 (oo ka tirsan Hawdka Togdheer, bariga Sanaag iyo degmooyin ka tirsan Taleex, Xuddun, Bandarbeyla, Qardho, Badhan iyo Dhaxar) dib u soo kabashada hab-nololeedku halis ayay ku jirtaa maaddama awrtii rarada ee hore uga dhintay ay xadiddayso dhaqdhaqaaqa iyo fursad-u-helidda saadka biyaha. Dhaaminta biyaha ayaa billaabantay xiliga caadiga ah ka hor. Kharashka ku baxaya biyaha iyo xoolaha gaadiidka ah iyo tartanka loogu jiro saadka daaqa ee haddu wuu sii kordhaya goobahaas. Waqooyiga bare ee gobolka Bari (degmooyinka Qandala, Caluula iyo Iskushuban), Hawdka Hargeysa, Koonfurta bari ee Hawdka Togdheer, Awdal iyo xeebta Maroodi Jeex dhammaan waxa lagu tilmaamay inay ku jiraa **Feejignaan Heerar Digniin Hore ah** (Khariidadda 1). Dhammaan goobahaasi roobabka Deyrta '05 way ka hooseeyeen caadi, taasoo keentay helitaan biyaha iyo daaqa oo xadidan ama sii yaraanaya, meelaha laga helo biyaha iyo kuwa laga helo daaqa oo si sii kordhaysa u kala fog, iyo guuritaan aan caadi ahayn. Xaaladda waqooyiga bari ee gobolka Bari waxa loo arkay inay sidii hore ka xuntahay waxana lagu tilmaamay inay ku jirto **Halis Dhexdhexaad ah** oo ay sii xumaanayso noqonaysana **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun.** Dhammaan goobahaasi waxay ku jiraan **Feejignaan Heerar Digniin Hore** oo u baahan in la kormeero xiliga jiilaalka ee soo socda.

### 1.3 WAXYAABAHA UGU MUHIIMSAN QAYBAHA

**Cimilada**

Roobabkii Deyrta '05/06 (October-December) guud ahaan waxay ka bilaabmeen koonfurta iyo qaybo ka mid ah gobollada dhexe si fiican umay di'in. Roobabka Deyrtu qaybo badan oo koonfurta Soomaaliya ah waxay ahaayeen` 0-10% qiyaasta mudada dheer ee Deyrta, taasoo loo arko in si buuxda roobka loogu guul-darraystay (Khariidadda 3). Roobabka waxa sidoo kale lagu guul-darraystay gobolada deriska ah ee Kiiniya iyo Itoobiya. Roobabkan Deyrta ee liitay waxa wehiliya in Gugii '05 roobabku ay caadi ka hooseeyeen badi koonfurta iyagoo u dhexeeyey 20-50% qiyaasta mudada dheer qaybo ka mid ah Baay, Shabeele iyo Hiiran. Waxana ay u dhexeeyeen 50-80% qiyaasta mudada dheer goboladda Gedo, Jubba iyo Bakool. Sawirrada satalaytka ee caqaarnimada daaqa muujinaya (Cabirka Cagaarka Dhirta) wuxuu si cad u muujinayaa inuu cagaarku aad u yaryahay badi dhulka xoola-iyo-beero-dhaqatada iyo xoola-dhaqatada ee gobollada koonfurta. Waqooyiga, roobabku badi way ka sarreeyeen caadi, marka laga reebo goobo ka tirsan bariga Sanaag, waqooyiga bari ee gobolka Bari iyo qayb ka mid ah Hawdka iyo gobolka Awdal ee ay soohdinta wadaagaan Jabuuti.

**Beeraha**

*Deyrtii* '05/06 soosaarka dalagga ee koonfurta Soomaaliya wuxuu ahaa qiyaastii 42,400 MT, taasoo ah soosaarkii dayrta ee ugu hooseeyey muddo toban sano ah (39% Celceliska Dagaalka Ka dib ee Deyrta ama Celceliska Dagaalkii Ka hor 34% ee Deyrtii u dambaysay ). Labda gobol, Jubbada Dhexe iyo Jubbada Hoose, waxay si buuxda ugu guul-darraysteen badi dalagga iyadoo qiyaasta heerarka soo saarku ay ka yarayd 7% ee Celceliska Dagaalkii Kadib ee Deryta ( (Jubbada Hoose 1%, Jubbada Dhexena 7% Celceliska Dagaalkii Kadib ee Deyrta). Qiyaasaha soosaarka dalagga ee afar gobol ee kale (oo ku yaalla dhulka Hadhuudhka laga beero) aad ayay iyaguna u liiteen, iyagoo ka yaraa 20% Celceliska Dagaalkii Kadib ee Deyrta (Bakool 13%, Gedo 14%, Hiiran 16% iyo Baay 23%). Waxa intaa raaca, soosaarka gallayda qiyaasta Shabeellada Dhexe iyo Shabeellada Hoose iyana aad ayay caadi uga hoosaysay 50% iyo 64% siday u kala horreeyaan ee Celceliska Dagaalkii Kadib ee Deyrta. Tan oo ay la weheliso soosaarka dalagga ee Gugii 05 oo isna hooseeyey oo ahaa kuu ugu hooseeyey muddo toban sannadood ah, macnaheedu waxay tahay in guudahaan soosaarka dalagga ee sannadku (*Gugii* '05 iyo Deyrtii '05/06) uu yahay 50% Celceliska Dagaalkii Kadib iyo kii ugu hooseeyey ee soosaarka dalagga sannadii ee muddo toban sano ah.

Xisaab-xidhka Sannadkii ee Dalagga (June '05-May '06) waxa lagu cusboonaysiiyey qiyaasaha soosaarka Deyrta iyo cuntada kaalmada ah ee la qaybiyey ilaa December '05. Natiijooyinku waxay muujinayaan in guud ahaan dalagga uu ka dhinmi doono 55,000 MT. Laba xilli oo soosaarka hadhuudhka iyo galaydu uu ka hooseeyey caadi ayaa horeba u keenaya inuu kordho qiimaha dalaggu. Celceliska qiimaha hadhuudhka ee dhammaan dhulka hadhuudhka laga beeraa (Gedo, Baay, Bakool iyo Hiiran) wuxuu gaadhay halkii ugu sarraysay 5tii sano ee la soo dhaafay iminkana wuxuu xitaa ka sarreeyaa qiimaha gallayda Shabeellooyina. Dhulka hadhuudhka laga beero, celceliska qiimaha hadhuudhku waxa ku kordhay in ka badan 50% taniyo bishii October '05. Qiimaha gallayda ee Jubba isaguna aad ayuu u kacay in ku dhow 50% taniyo bishii September '05. Hase yeeshee, soosaarka dalagga ee *Karan* (oo go'ay bishii November '05) degmooyinka xoola-iyo-beero-dhaqatada ee waqooyiga (Awdal, Galbeed iyo Togdheer) waxa lagu qiyaasay 160% oo soosaar dalagga Karanta ah oo caadi ka sarreeya. Inkastoo soosaarkan caadiga ka sarreeyaa uu u faa'iidayn doono dhammaan gobollada waqooyi galbeed, wadarta dalagga guud wuxuu ku kordhin doonaa illaa 26,000 MT oo keliya.

Falanqaynta Deyrta 2005/6 Kadib

Falanqaynta Deyrta 2005/6 Kadib

**Xoolaha**
Xaaladda jidhka, soosaarka iyo dhalmada xoolaha ee dhammaan badi Koonfurtu aad ayay u liidataa sababtoo ah waxa kooban biyaha iyo daaqa taasoo ka timi roobabkii Gugii'05 oo aan fiicnayn iyo roobabkii Deyrta '05/'06 oo lagu guul-darraystay. Lo'da oo ah xoolaha ugu badan ee lagu dhaqdo gobollada Gedo, Jubbooyinka iyo qayb ka mid ah Baay iyo Bakol, waxa weeye kugu ugu daran ee ay abaartay saamaysay badbaadadooda xiliga jiilaalka ee soosocdana lama hubo. Qiyaastii 20-30% lo'du horeba way u dhinteen Gedo iyo qaybo ka mid Jubbooyinka biyo iyo cows la'aan iyo cudurro la xihiidha abaarta dartood. Qiyaasaha hore waxay sheegayaan in ilaa 80% lo'du ay dhiman karaan Gedo inta laga gaadhayo bisha April,intaanay roobabka gugu di'in. Guuritaan aan caadi ahayn oo xooluhu ay ku tegeen webiyada Jubba ayaa dhacyey taniyo bishii August '05, laakiin iminka guuritaankaasi wuu kurdhay wuxuuna xoogaystay. Guuritaan aan caadi ahayn oo ay xoola-dhaqatadu waqooyiga bari ee Kiiniya ay ku tegayaan webiyada Jubba iyagoo raadinaya biyo iyo daaq ayaa sii xumeeyey xaaladda iyagoo dhamaynaya saadka xadiddan. Tartanka loogu jiro seeraha iyo fursadaha suuqyada ayaa sii kordhinaya colaadda ku salaysan saadka ee ka dhaxaysa beeralayda iyo xoola-dhaqatada. Qiimaha suuqa ee xoolaha gaar ahaan lo'da ayaa aad hoos ugu dhacay waxana uu ku wadi doonaa inuu hoos u dhaco. Qiimaha lo'da wuxuu hoos u dhacay 40-60% marka loo eego sannadkan horraantiisii (February '05), degmooyinka Baar Dheere (Gedo), Salagle, Saakow, Bu'aale (Jubbada Dhexe) iyo Afmadow (Jubbada Hoose). Xaaladda jidhaka geela iyo adhiga ee koonfurtu waa caadi sababtoo ah way uga adkaysi badanyihiin xiliyada adag. Gobollada Waqooyiga iyo Badhtamaha, xaaladda jidka xooluhu guud ahaan waa caadi . Qaybo badan oo ka mid ah Banka Sool iyo dooxada Nugaal geelu way dhalayaan caanahana waa la helaa. Hase yeeshee, sababtoo ah dhibaatada gaadhay hab-nololeedka 3dii sano ee ay abaarti jirtay darteed xoola-dhaqato badan oo jooga goobaha roobabka lagu guul-darraystay ayaa ku jiray inay helaan baahidooda biyaha sababtoo iyagoona haysan awrta rarada iyo daymanka weli lagu leeyahay dartood.

**Suuqyada**
Shilinka Soomaaliya iyo ka Soomaalilaand labaduba waxay ku wadaan inaanay isbedelin muddo sannad ah (taniyo bishii January ee 2005). Sarrifka Shilinka Soomaaliya ee Doolarku waxa weeyee illaa 15,000-15,600. Sarrifka shilinka Soomaalilaandna waa 6,000-6,400. Labada lacagyowba way xoogaysteen marka loo eego sarrifka Doolarku intuu ahaa January '04, laakiin weli aad ayay uga hooseeyaan qiimahoodu siduu ahaa intaan la mamnuucin dhoofinta xoolaha, 131% iyo 55% qiimaha-dhac ah marka loo eego sarrifka Doolarka Maraykanka ee Shilinka Soomaaliya iyo Shilinka Soomaaliland siday u kala horreeyaan taniyo January 2000.

**Nafaqada**
Qayb weyn oo ka mid ah dadweynaha hadda ku jira gurmad bina-aadamnimo iyo xiisad xagga bina-aadamnimada ahi, horeba waxa u haysay nafaqa-darro uu heerkeedu aad u sarreeyo. Wadarta nafqa-darrada ee hadda taagani waxay ka sarraysaa 15% badi degmooyinka. Degmooyinka qaarna heerarka nafaqadaradu intan way ka sarreeyaan. Warbxinaha Nafaqada ee FSAU ee January iyo February 2006 ayaa bixinaya qaar ka mid ah warka lagu qaadhay falanqayntan. Tilmaamaha hore ee ah in xaaladdu ay sii xumaanayso waxa lagu ogaaday heerarka nafaqa-darrada ee sii kordhaya ee dadka la dhigayo xarumaha caafimaadka iyo kuwa quudinta iyo nafaqaynta. Fursad-u-helidda cunto iyo biyo la aqbali karo kuna fulan dadka ayaa ah arrimaha ugu waaweyn ee xaaladda hadda sii xumaynaya. Arrimahan waxa weheliya cudurrada la kala qaado oo sii kordhay oo ay ku jirto jadeecadu, fursad-u-helidda daryeelka caafimaadka oo yaraatay iyo waxyeelada xun ee gaadhay daryeelka qoyska dhaqdhaqaaqa dadweynaha dartood.

**Nabad la'aan**
Halista colaadda balaadhan ee siyaasadda oo ay keenayaan xiisadaha aan weli la xalilin ee ka dhexeeya Dawladda ku Meel Gaadhka ah ee Federaaliga ah dhexdeeda, waxa barbar socda tartan loogu jiro saadka dabiiciga ah. Kaasoo ah sababta ugu weyn ee keenaysa colaadda. Colaadaha aan la xalilin ee ka jira dhowr goobood (degoomooyinka Qansax Dheere, Diinsor, Tiyeglow iyo Buulo-burti, xiisad sii socota oo ku saabsan saadka biyaha iyo daaqa oo ka jirta koonfurta Baraawe iyo colaad qabiil oo laga soo cusboonaysiiyey waqooyiga Galgaduud iyo koonfurta Mudug) ayaa qasay fursad-u-helidda ganacsiga iyo suuqyada. Waxana ay keeneen barakac iyo hantidu inay khasaarto. Waxa la filayaa in saamaynta abaartu ay xoojinayso halista ka imanaysa colaadda saadka ku salaysan ee Gedo iyo dhulka webiyada Jubba ee sii kordhaysa maaddaama xoola-dhaqatadu ay iska horyimaaddaan beeralayda webiyada iyagoo isku haysta saadka daaqa. Colaadda saadka ku saabsani haddii ay sii korodho waxay mijo-xaabin doontaa xaaladda hubinta cuntada iyo hab-nololeedka ee horeba u xumayd. Waxa intaas raaca shilalka ku saabsan nabadsugidda (shuftada badda, colaadda degmooyinka ku kooban, ama waddooyinka muhiimka ah ee la xidho) kuwaas oo xayira bedeecadda gancasiga oo ay ku jiraan dalagga aasaasiga iyo kaalmada xagga bina-aadamnimada. Waxana ay keenayaan halis ah in qiimaha dalagga uu sicir-barar ku dhaco iyo guudahaan inay xayiraan helitaanka iyo fursad-u-helidda cuntada ee dadweynaha ku jira **Gurmad Bina-aadamnimo** ama **Xiisad Cuntada iyo Hab-anololeedka ah oo Aad u Xun**.

**Warbixinaha dhaowaan Af Ingriisiga ku soo baxay**

*Taxanaha Farsamada Lambar 1V.8, Falanqaynta Deyrta 2005/6 Kadib, February 22, 2006*
*Warbixinta Nafaqada ee FSAU, February, 2006*
*Warbixinta Xogta Suuqyada ee FSAU/FEWSNET, February 2006*
*Warbixinta Xogta Cimilada ee FSAU/FEWSNET,, February 2006*
*Warbixinta Hubinta Cuntada Gurmadka ah ee FEWSNET, February 2006*

Technical & Managerial Support    Funding Agencies    Technical Partners